



# San Diego Unified School District

## Fact Sheet

### Jalleecida San Diego Unified School District

San Diego Unified School District waxay hada u adeegtaa in ka badan 135,000 ardey ah, oo heerarka fasalkoodu u dhexeeyo dugsiyada xanaanada ka horeeya ilaa iyo 12aad. Waxbarashadda degmada San Diego waxaa la aasaasay bishii Luuliyo 1854, waxaana lagu bilaabay dugsi yar oo dhismuhu kiro yahay iyo hal macallin, wuxuuna u ballaadhey inuu noqodo degmada labaad ee dugsiyada ku yaal dawladd-goboleedka California.

Dhambaalka San Diego Unified School District waa

- In la dedejiyo inay ardeydu waxbarashadda guul ka gaadhaan,
- In ay dugsiyadu noqdaan kuwo badbaado, nabadgelyo iyo dayactirba leh,
- In la xoojiyo xidhiidhka jaalnimo ee waalidiinta iyo jaaliyada lala leeyahay
- In niyada shaqaalaha kor loo qaado iyo
- In miisaaniyad ku filan dugsiyada loo helo.

Dr. Carl Cohn waxaa loo doortey inuu noqdo Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada bishii Oktoobar 2005. Wabrashadda degmada waxaa maamula shan xubnood oo guddiga sare ah – mid kastana waxaa la doortaa wakhti afar sanno ah:

Mitz Lee, Degmada A : wakhtigu wuxuu kaga eg yahay 2008  
 Katherine Nakamura, Degmada B (Guddoomiye): wakhtigu wuxuu kaga eg yahay 2010  
 John de Beck, Degmada C (Guddoomiye Ku-xigeen): wakhtigu wuxuu kaga eg yahay 2010  
 Luis Acle, Degmada D : wakhtigu wuxuu kaga eg yahay 2008  
 Shelia Jackson, Degmada E: wakhtigu wuxuu kaga eg yahay 2008

Waxbarashadda degmadu waxay ku fadhidaa dhul baaxadiisu dhan tahay in ka badan 200 maayl oo laba jibbaaran, taas oo ay ku jiraan 221 goobaha waxbarashadda iyo qalabka waxbarashadda fududeeya oo dheeraad ah. SDUSD waxay ka kooban tahay shan aag oo waxbarasho. Aag kasta waxay ka kooban tahay 25 dugsi hoose iyo dugsiyada dhexe ee u dhaw, taas oo uu maamulo madaxa waxbarashadda dugsiyada ee aagaas. 29 dugsi sare ee waxbarashadda degmada ku yaala waxaa maamula kaaliyaha madaxa waxbarashadda dugsiyada.

Sannadkii 1998, Dadweynaha codeeya waxay boqolkiiba toddobaatan iyo siddeed (78%) ansaxiyeen lacag dhan \$1.51 balyan oo loogu talagalay Qorshaha MM (Proposition MM). Maanta Qorshaha MM waxay si wanaagsan u wadaa jadowalkii ay dejisatay, waxay dhammeystiraysaa miisaaniyadii oo ay ku qabatay dhammaan shaqooyinkii ay ka ballan qaadey cod-bixiyaasha. Lacagtaas waxaa loo qorsheeyey in 12 dugsi oo cusub iyo saddex dugsi oo dib loo dhisayo. Sannadkan 2005, Proposition MM waxay ku guuleysatay abaalmarinta la yidhaahdo Golden Watchdog Award, oo ah abaalmarinta ugu qiimo badan ee ay Ururka Canshuur-bixiyaasha Gobolka San Diego ay cid siyaan, taas oo ay ugu qireyaan sidii wanaagsaneyd ee ay doolarada canshuur-bixiyaasha loo isticmaaley.

Arimaha ugu muhiimsan guulaha waxbarashadda degmadu waa sida ay ula shaqeyso ganacsiyada, hoggaamiyaasha jaaliyada iyo dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeyya, iyo weliba xidhiidhaha ay la leedahay kullejooyinka deegaanka iyo jaamacadaha. In ku dhaw 1,400 oo ganacsi iyo ururada bulshada ayaa Jaal Waxbarasho la ah degmada. Sannad-dugsiyeedkii 2006-07, jaalalkaasu waxay ku deebeen qiyaastii lacag dhan \$5.6 malyan taas oo ku timid xoog dadweyne, maaliyad ahaan iyo adeegyo. Degmadu waxay kaloo ka faa'iideysatay wakhtigii ay shaqeyeen 26,000 oo ah dad iskaa-wax-u-qabso ku shaqeyey. Sannadkii 2006-07, dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeyya waxay shaqeyeen 990,000 oo saacadood, taas oo uu qiimahaeedu u dhigmo in ka badan \$18 malyan. (waxay ku salleysan tahay celceliska mushahaarka saacadii la siiyo dadka aan beeraha ka shaqeynin oo ah \$18.77 ee Ha'ayadaha Madaxa-bannaan, Washington, D.C.).

Somali version: SDUSD At a Glance

Xidhiidhka Warbixinada: Waaxda Isgaadhsiinta (619) 725-5578

[www.sandi.net](http://www.sandi.net)  
 La naqtiimay 09/19/06

## OO KOOBAN

- ❖ 135,053 oo ardey (Fasalada Xanaanada ka horeeya ilaa iyo 12aad)
- ❖ Degmada 2aad ee ugu weyn California
- ❖ Degmada 8aad ee ugu weyn Maraykanka
- ❖ 9,274 shaqaalaha shahaadada ku shaqeyya
- ❖ 8,115 shaqaalaha aan shahaadada ku shaqeynin
- ❖ 15,112 wadarta la midka ah shaqada wakhti-buuxa shaqeyya
- ❖ 24,004 wadarta shaqaalaha ( kuwaasoo ay ku jiraan kuwo saacado ku shaqeyya iyo macalimiintadugsiyada soo boqda ee wax ka dhiga
- ❖ 221 wadarta goobaha waxbarashadda
  - 118 dugsiyada hoose
  - 24 dugsiyo dhexe
  - 29 dugsiyo sare
  - 15 dugsiyada aan caadiga ahayn
  - 35 dugsiyada gaarka ah
- ❖ kala duwanaanshaha jinsiyadaha (ardeyda):
  - 44.4% Hisbaanik
  - 25.3% Cadaan
  - 13.5% Afrikaan-Ameerikaan
  - 6.6% Filibiino
  - 5.2% Indhoojaayniis
  - 3.5% Eeshiyaan
  - .55% Maraykanka Asalka ah
- ❖ Dhaqan-dhaqaalaha ay isugu jiraan:
  - 29.5% Af Ingiriis Baraneysa
  - 56.9% xaq u leh cunto lacag la'aan ah ama qiimaheeda la dhimay
- ❖ Qiyaastii 16,000 oo ardey waxaa la siiyaa waxbarashadda khaaska ah
- ❖ Qiyaastii 10,864 oo ardey waxay ka yimaadeen qoysaska mileteriga
- ❖ In ka badan 22,500 oo ardey waxay ka qaybgalaan Barnaamijka ardeyda Hibada iyo Kartida gaarka ah
- ❖ Miisaaniyad-sannadeedku waa \$2.2 bilyan